

## **HADALKA IYO BARASHADA CUDURKA LUQADA**

**Maxaa ilmahaygu u arkayaa qof aqoon u leh cudurada hadalka la xiriira?**

- Ilmahaygu ma hadlayo.
- Ilmahaygu hadal kooban ayuu yaqaan.
- 🐥 Ilmahaygu wuxuu sheegaa jumlada gaagaaban wuxuuna sameeyaa qalad la xiriira naxwaha hadalka.
- 🐥 Ilmahayga way ku adag tahay inuu wax fahmo.
- 🐥 Ilmahaygu si xun ayuu u dhaqmaa.
- 🐥 Ilmahaygu wuxuuu waqti badan ku lumiyaa wax uu ku celcelinayo iyo waxyaallo isagu abuurayo.
- 🐥 Ilmahaygu aad ayuu u xishood badan yahay mana awoodo inuu la hadlo dad aanu aqoon.
- 🐥 Ilmahaygu wuxuu leeyahay maqal marna hoos u dhacaya marna kordhaya ama joogto u lumaya.
- 🐥 Ilmahaygu ma awoodo inuu wax maqlo ama wax aad ula socdo.
- 🐥 Ilmahaygu ma awoodo inuu raaco awaamiirta.
- 🐥 Ilmahayga hadalka waa shigshigaa.
- 🐥 Ilmahaygu dugsiga wax kuma baran karo.
- 🐥 Ilmahaygu wuxuu dhibaato ku qabaa hellida ama yeellashada saaxiibo.
- 🐥 Ilmahayga codkiisu wuxuu u dhawaaqaa si aan fiicnayn
- 🐥 Ilmahaygu wuxuu qabaa jirooyin ama xaallado waxyeella hadalka, xusuusta ama xalinta dhibaatooyinka.

## **Goormaa ilmahaygu arkayaa qof aqoon u leh cudurada hadalka?**

- 🐥 Isla markaad ogaato in dhibaato ka jirto korida ilmahaaga hadalkiisa, luqadiisa ama la xiriirida dadka sababtoo ah wax ka qabashada hore si fiican ayey u shaqaysaa.

## **Muxuu sameeyaa qofka aqoonta u leh cudurada hadalka?**

- 🐥 Wuxuu aqoonsadaa dhibaataada.
- 🐥 Wuxuu qoyska u sharxaa dhibta.
- 🐥 Wuxuu qoraa warbixin si loogu geeyo kuwa kale.
- 🐥 Wuxuu la hindisaa oo la qorsheeyaa qoysaska iyo daryeellayaasha hab daawo qaadasho.
- 🐥 Wuxuu dawweeya ilmaha isaga oo ay caawimayaan qoyska iyo daryeellayashu.
- 🐥 Wuxuu tala-siiyaa waalidiinta, barayaasha iyo mihnadlayaasha kale oo ilmaha la shaqeeya.
- 🐥 Wuxuu qiimeeyaa horumarka ilmaha.

Isha macluumaadka: Dr Susanne Dopke: [www.bilingualoptions.com.au](http://www.bilingualoptions.com.au)